Larvik kommune

Oppvekst og kvalifisering

# Ku soo dhawow xannaanada-carruurta ee Larvik!



Somali

# Fiicnaansho, saaxiibtinnimo, xannaanayn iyo horumar

Qoraalkaan yar ee xayaysiinta ah, waa warbixin kooban oo ku saabsan xanaanada-carruurta, iyo inyar oo ku saabsan waxaad kula kulmaysaan xannaanada carruurta idinka oo ah carruur iyo waalidiinba. Xanaanada-carruurtu waa meel fiicnaansho, saaxiibtinnimo, xannaanayn iyo horumar. Qiyaastiii kuligood carruurta inta ka horeeysa da'ada iskoolka ee Norway, waxay tagaan xannaanada-carruurta. Dhammaan waxqabadka xannaanada-carruurta waxaa nidaaminaya sharciga ku saabsan xannaanooyinka carruurta.




**CIYAAR IYO BARASHO**

Carruurtu waxay la kulmi doonaan farxad iyagoo la ciyaari carruurta kale ee xannaanada-carruurta.
Ciyaarta, carruurtu saaxiibo ayay yeeshaan oo waxay ka mid noqon isku xirnaanta xagga bulshada.
Carruurta kale oo lala ciyaaro sidoo kale waxay aad muhiim ugu noqonaysaa horumarinka-luqada iyo si loo barto afka norwiijiga. Xannaanada carruurtu ayaa fududayn doonta mid kasta inuu ka qayb galo ciyaarta.

**CARRUUR LUQADO DHOWR AH KU HADLA**


In ay awoodaan dhowr luqadood waxay u noqonaysaa carruurta naftooda iyo bulshada labadoodaba hanti weyn.
Shaqaaluhu waa inay taageeraan oo aqoonsadaan afka hooyo ee carruurta, isla mar ahaataana waa inay iyagu dalacsiiyaan oo horumariyaan aqoonta afka norwiijiga ee carruurta. Markuu cunugu baranayo labo luqadood isku mar, way fiican tahay in xannaanada carruuta iyo waalidiintu iskaashadaan, Tusaale ahaan iyadoo waalidiinta iyo carruurtu kuwada hadlayaan guriga iyaga oo ku hadlaya afkooda hooyo /luqada hooyo oo ku saabsan waxay carruurtu kula kulmeen xannaanada carruuta. In badan ka akhriso mowduuca buugga yar, *Barn i flerspråklige*


FUNK



*familier*. Buug-yaraha waxaa laga helayaa luqado badan, oo leh qoraal iyo maqal labadaba.
https://morsmal.no/no/veiledning-til-foreldre/5135-informasjonsheftet-barn-i-flerspraklige-familier

**QORSHOOYINKA SHAQADA EE XANNAANADA CARRUURTA**
Koligood xannaanooyinku waxay leeyihiin qorshahooda u gaarka ah oo sanad ah,




kaasoo waalidiintu helaan. Qoshaha sanadka waxaa loo samaynaya iyadoo lagu saleynayo qorshaha qaranka ee xannaanada carruurta: Qaab dhismeedka qorshaha xannaanada carruurta. Waxaa la samayn sidoo kale qorshaha toddobaaka iyo qorshaha bisha. qorshayaashu waxay sheegayaan sida xannaanada carruurtu u shaqeyso si ay carruurta u siiso nabadgalyo iyo xannaano, iyo sida ay ugu qorshayn ciyaarta iyo barashada. Xannaanooyinka dhamaantood waxay leeyihiin shaqaale leh waxbarasho taasoo hubin doonta in carruurtu hesho adeeg wanaagsan oo ay bixiso xannaada carruuta.

**WAAJIBKA XOG QARINTA**
Shaqaalaha xannaanada waxaa waajib ku ah inay qariyaan xogta. Taas macnaheedu waa in shaqaaluhu aysan qaybin karin warbixinta qarsoodiga ah oo ku saabsan carruurta, qoyska iyo saaxiibada shaqada. Jebinta waajibaadka xog qarinta waa ciqaab. Dhammaan shaqaaluhu waa inay soo gubiyaan caddayn booliis ka hor intaysa bilaabin inay ka shaqeeyaan xannanada carruurta.

**WADASHAQEYNTA KA DHAXAYSA WAALIDIINTA IYO XANNAANADA CARRUURTA**
Xannaanada carruurtu waxay mashquul ku tahay wadashaqeyn wanaagsan oo ay la yeelato waalidiinta. Xannaanada carruurtu waxay jeclaan lahayd inay ogaato waxa adinka waaliddiinta ah u maleynaysaan inay muhiim u tahay ilmaha. Wadahadalka maalin kasta oo ah marka la geynayo

Xannaanooyinka dhamaantood waxay leeyihiin shaqaale leh waxbarasho taasoo hubin doonta in carruurtu hesho adeeg wanaagsan oo ay bixiso xannaada carruuta.

carruurta iyo marka la qaadayo waa muhiim. Waxaa intaas dheer xannaanda carruurtu waxay leedahay shirar kala duwan, kuwaas oo laga sheego warbixino ku saabsan xannanadu waxa ka kooban tahay iyo shaqada haabkeeda. Shirarka qaarkood waa kulamo walidiinta oo dhan, kuwo kalena waa wadahadal gaar ah oo lala yeesho waalidiinta oo u la socdo ilmo kasta. Kulamada noocaan oo kale ah waalidiintu waxa la imaan karaan aragtiyo ah shaqada ka jirta xannaanada carruurta.
Way fiicantahay haddii Shaqaaluhu iyo waalidiintu ay haystaan waqti yar oo ay ka hadlaan sida maalintu u ahayd cunnugga ku jira xannaanada carruurta. Waydii, ha ka baqin markaad wax ka fakarayso.

**TURJUBAAN**

Xannaanada carruurtu waxay ballamin karaan turjubaan ayadoo la adeegsanayo adeega turjubaanada. Waxay noqon karta mid faa'iido leh in la adeegsado tarjubaan si shaqaalaha iyo waalidku u hubiyaan in ay si fiican isu fahmeen.

**DHARKA IYO QALABKA**

Carruurta iyo dadka waaweyn bannaanka ayay joogaan in mudo ah maalin walba sanadka oo dhan oo waxay u baahan yihiin dhar ku habboon nooc kasta oo cimilada ah. Ilmo kasta waxuu helaa khaanad u gaar ah halkaas ayay ku haysan karaan dharkooda u gaarka ah. In badan ka akhriso dharka labiska xilliga qaboobaha oo ku qoran dhowr af bogga internetka (afka hooyo.no:) morsmål.no: https://morsmal.no/no/foreldre-norsk/2382-kle-barna-riktig-i-vinterkulda

**CUNTADA**

Xannaaanooyika qaarkood, carruurtu waxay haystaan cuntadooda u gaarka ah. Xannaanooyika qaar kale waxaa cuntada lagu samayaa xannaanada carruurta. Waxaa markaas la siiyaa inta badan rooti, miro iyo khudrad. Waalidiintu waxay bixinayaan inyar oo lacag ah. Ogeysii xannaanada carruurta haddii ilmahaagu qabo xasaasiyad (allerji), ama haddii ay jirto cunto uusan ilmuhu cunaynin sababtoo ah diinta.

**ABBAALDAGA MAALINTA DHALASHADA**

Waa dhaqan in shaqaalalaha xannaanada carruurta ay xusaan dhalashada ilmaha. Sida tan loo samaynayo, way ku kala duwan yihiin xannaanooyinku. Carruurtu waxay si aad ah ugu farxaan, in loogu dabdaaldago xannaanada carruurta.

**LACAG BIXINTA**

Adinku waxaad xaq u yeelan kartaa



bixinta lacagta oo la idinka dhimo, ama boos bilaa kharash ah. Warbixin ku saabsan arintan waxay ku taalaa degmada boggeeda internetka https://www.larvik.kommune.no/barnehage/pris-og-redusert-betaling/
Muhiim!: Waa in la codsadaa lacag bixinta la dhimo ugu danbayn 01.06. kahor sanadkasta oo cusub oo xannaanada carruurtu bilaabanayso.

**BILAABID**

Marka uu ilmuhu bilaabayo xannaanada carrurta, mid ka mid ah waalidiinta ayaa wehelin doona maalmaha ugu horreeya. Arintan loo shaqeeyeyaasha qaarkood waxay siiyaan waalidiinta fasax leh mushaar. Waxaad kala heshiin doontaan madaxa cilmiga rabbaynta inta ay idinku qaadanayso inaad joogtaan xannaanada carruurta, si ilmuhu u dareemo amaan.

Xanaanada-carruurtu waa meel fiicnaansho, saaxiibtinnimo, xannaanayn iyo horumar

Larvik kommune

larvik.kommune.no